Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda
**Qoraal Kooban**
12
04 I 2016

# Baarlamaanku Ha Saxo Go'aammada Madasha Hoggaanka Qaran

## Hordhac

Habraaca doorasho [1] ee ay soo saareen Madasha Hoggaanka Qaran[2] ee muujineysa qorshaha 2016-ka ee soo xulista / doorashada ma aha mid horrumarinaysa hirgelinta hannaan dimoqraadi ah. Weliba, qaar ka mid ah qodobada qorshaha lasoo jeediyey waxaa ay aad u cabburinayaan rajada laga qabay in la helo hannaan xulid/doorasho oo xalaal ah, loona dhanyahay. Inkasta oo ay tahay mid dhiirrigelin leh madaxda federaalka iyo kuwa gobollada oo ay ku badnayd is-qab-qabsigu in ay gaareen is afgarad, haddana habraaca doorasho oo ay ku heshiiyeen waxa uu leeyahay khaladaad badan oo haddii loo hirgeliyo sida ay u dhigeen keeni kara colaad ka dhex dhalata bulshada, hay'adaha dowliga ah oo daciifa, iyo awood marooqsi. Nasiib wanaag, madaxda Madasha Hoggaanka Qaran waxa ay ku dareen qorshaha doorashada qodob sheegaya in baarlamaanku ansixin doono. [3] Maaddaama wakhtigu kooban yahay, hirgelinta qorsho doorashana uu aad muhiim u yahay, baarlamaanka waa in uu si qoto dheer u eegaa qodobada heshiiska, hagaajiyaana halka sixid u baahan islamarkaana u ansixiyaa sida ugu deg-degsiiyaha badan.

## Aqalka Sare

Qodobada ugu muhiimsan ee heshiiskii 12-ka April 2016 u dhexeeyay madaxweynaha, guddoomiyaha baarlamaanka, ra'iisul wasaaraha iyo kuxigeenkiisa iyo madaxda dowlad-goboleedyada / maamullada ku-meelgaar ah waa mid hoos uga dhacay ballanqaadyadii hore ee ahaa in la helo hannaan dimoqraadi ah, xalaal ah, loona dhan yahay[4]. Qodobbo muhiim ah oo kamid ah heshiiska waxa ay daboolayaan danaha wakhtiga dhaw ee siyaasiyiinta wax saxiixday, halkii looga fadhiyey in ay adkeeeyaan mabaadii'da dimoqraadiyadda. Qodobada aysan u meel dayin waxa kamid ah isku dayga ah in hoggaanka gobolladu ay soo magacaabaan dhammaan xubnaha aqalka sare, taasi oo ah hannaan caqabad ku ah dadaalada dimoqraadiyaynta ee heer gobol iyo heer qaran-ba. Qorshaha lasoo jeediyay waxa uu siinayaa golaha fulinta heer gobol ama madaxwynayaasha gobollada awood ay kusoo magacaabaan laba musharrax oo u tartanta kursi kasta ee aqalka sare ah, iyada oo baarlamaanka gobolkana uu xulan doono mid kamid ah musharraxiinta lasoo xulay. Waxaa halkaasi ka cad in qorshahan loo sameeyay in uu ku caawiyo hoggaanka gobolada in ay aqalka sare keensadaan dad iyaga ku dhow. Dastuurka ku-meelgaarka ah waxa uu tilmaamayaa in aqalka sare lasoo doorto. Caqliga fiyowina waxa uu tusayaa in hay'addan muhiimka ah, cusubna, loo yagleelo hannaan hufnaan sare leh salkana ku haysa rabitaan dadweyne. Weliba, intii aqalka sare laga dhigi lahaa mashruuc ay feentaan madaxda gobollada, aqalkani waa in uu noqdaa mid metela dhammaan muwaadiniinta ku nool maamul goboleedyada.

## Guddiga Doorashooyinka

Sidaas si lamid ah, aragtida ah in doorashooyinka ay maamuli doonaan xubno ay soo magacaabeen saxiixayaalka ama madaxdii shirtay (oo inta badan musharraxiin ah ama taageeraya musharrax kale) waxa ay dhaawacaysaa rajada laga qabay in ay dhacdo soo xulid/doorasho xor ah, xalaalna ah, waayo musharrax madaxweyne haddii xildhibaan qor la yiraahdo, in uu isagu qaadanayo oo saaxiibkiis qorayo qofna la weydiin maayo. Sidoo kale, in la sameeyo guddiyo doorasho oo heer gobol ah – oo ay soo magacaabayaan siyaasiyiinta madaxda ka ah gobollada – waa mid aan loo baahneyn, haddii aanuba dhaawacayn in la fuliyo hannaan doorasho loo dhan yahay. Doorashada soo socota waa mid heer qaran ah sidaasi darteed guddi doorasho qaran ayaa loo baahan yahay in uu hoggaamiyo hannaanka. Waxaa kasii walwal badan, in maamulka soo xulista 275-ta xubin ee aqalka hoose loo gacan geliyo shakhsiyaad ay soo xuleen hogaamiyayaasha gobollada, tani waxa ay keeni kartaa in si khaldan loo maamulo hannaanka haddii aanayba noqonin in kuraasta la iska boobo. Qabaa'ilka Soomaalidu waxa ay guud ahaan isku arkaan kuwo kala madax bannaan ama ka soocan

[1] Halkaan ka eeg qorshaha oo dhammaystiran http://www.wardheernews.com/wp-content/uploads/2016/04/NLF-Communique-Final-April-12-2016.pdf

[2] Xubnaha Madasha Hoggaanka Qaran waxa ay kala yihiin madaxweynaha, raysal waraasarah, raysal wasaare ku xigeenka, iyo guddoomiyaha baarlamaanka federaalka, iyo madaxweynayaasha saddex maamul goboleed kumeelgaar ah iyo madaxweynaha Puntland.

[3] War-murtiyeedka waxa uu tilmaamayaa in go'aammada Madasha Madaxda la geeyo Golaha Shacabka

[4] Bulshada caalamku qudheedu waa ay soo dhaweysey mabaa'diidaas (http://reliefweb.int/report/somalia/international-community-welcomes-mogadishu-declaration-2016-electoral-process)

qabaa'ilka kale, haddaba, haddii ay siyaasiyiinta gobolladu isku dayaan in ay wax-is-daba-mariyaan waxa ay taasi dhalin kartaa colaad iyo qalalaase laga fogaan karey. In la iska kala hoos-baxo hannaanka soo xulista doorashooyinka halkii loo hawl-geli lahaa in kor loo qaado hufnaanta doorashooyinka, waxa ay kala dhantaali kartaa suurta-galnimada in sanadka 2016 uu dhacdo isbeddel siyaasadeed oo macno leh; waxa ay sidoo kale yareyn doontaa rajada ah in doorasho qof iyo cod ah ay dhacdo sanadka 2020[5]. Tallaabooyin cad cad waa in la qaadaa si looga dhigo soo xuliddan taariikhiga ah mid leh hannaan cadaalad ah oo ka maran afduub. Hal guddi, la aamini karo, loo dhanyahay, aan dhinac u janjeerin, islamarkaana madaxbannaan, sida uu dastuurku sheegayo, waa in uu hagaa hannaanka doorasho. Shakhsiyaad ay soo magacaabeen siyaasiyiin musharraxiin ah waa in aanay dhaawicin dhaqangelinta hannaanka loo dhanyahay ee horey loo ballan qaaday.

## Saxiixa ugu danbeeya iyo Muqdisho

In saxiixa hoggaamiyayaasha gobollada laga dhigo shardi ku xiran dhameystirka xulidda xildhibaannada awoodda diidmada qayaxan ayay sidoo kale siinaysaa siyaasiyiinta soo qoray hab raaca doorashada, taasi oo ah awood marooqsi aan daw ahayn. Waxaa intaa dheer, Madasha Hoggaanka Qaran waxa ay si ula kac ah xaqoodii u duudsiyeen 1.7 malyan qof oo deggan caasimadda dalka ee Muqdisho, xaqaasi oo ah in ay xubno ku yeeshaan aqalka sare; arrinkan waa mid aan dimoqraadi ahayn ahna faquuqid. Inta badan dakhliga dowladda federaalka waxa uu ka yimaadaa dekedda iyo gegida diyaaradaha ee Muqdisho. In dadka Muqdisho canshuur laga qaado metelaadna loo diido ma aha maangal. In kuraas ku filan loo qoondeeyo waa muhiim si shacabka magaaladu ay u helaan metelaadda ay u baahan yihiin, dhiggooduna ay haystaan, iyada oo mudanayaasha la soo dooranayna noqonaya kuwo ay Soomaali ku dhan tahay, si maqaamka caasimaddu aanu u kala dhantaalmin.

## Metelaadda haweenka

Hoggaamiyayaasha siyaasadda waxa ay sidoo kale dib u celiyeen qodobka dastuuriga ah ee sheegaya in soddon boqolkiiba kuraasta baarlamaanka loo qoondeeyo haweenka (aqalka hoose); waxa ay Madasha Hoggaanka Qaran sheegeen in boqolkiiba soddon ay haweenku ka noqon doonaan kontonka qof ee u codayn doona xildhibaannada. Tani macnaheeda ma ahan in soddon boqolkiiba xildhibaannada lasoo dooran doono ay noqon doonaan haween, waxa ayna ka fog tahay doorasho loo dhanyahay. Hoggaamiyayaasha waxa ay sidoo kale heshiiska ku isticmaaleen erayo aan caddayn, oo keeni kara in hannaanka la afgambiyo. Tusaale ahaan, heshiiska waxa uu xusayaa, "in liiska hoggaanka odayaasha dhaqanka dib loo eegi doono, odayaasha dhintay la beddeli doono, kuwa lagu muransan yahayna la sixi doono … iyo in liiska odayaasha lagu heshiiyay ay soo xuli doonaan dadka wax dooranaya." Yaa sameyn doono 'dib u eegista', 'bedelidda', 'dhameystirka' iyo 'sixidda'? Ma cadda; laakiin waxa hubaal ah in siyaasiyiintu ay si toos ah ama aan toos ahayn isugu dayi doonaan in ay go'aamiyaan liiska odayaasha ugu danbeeya.

## Gunaanad

Sanadkii 2012, hogaamiyayaasha siyaasadda qaranka waxa ay ballan qaadeen in ay horseed ka noqon doonaan in ay doorasho qof iyo cod ah dhacdo bisha Ogosto 2016.[6] Waase ay ku guuldareysteen. Sidoo kale, siyaasiyiinta federaalka iyo kuwa gobollada waxa ay sanadkii tagay sheegayeen in ay ka go'an tahay hirgelinta hannaan doorasho oo loo dhan yahay oo muwaadiniinta awood loo siin doono in ay doortaan musharraxiinta. Go'aanka 12-ka April ay madaxdu gaartay waxa uu muujinayaa in ay iyagu isku abaalmariyeen xaqii muwaadiniinta iyo kaalintii odayaasha.[7] Saxiixayaasha waxa ay isa-siiyeen awood ay ku maamulayaan odayaasha, ku magacaabayaan guddiyada doorashooyinka, ku xulanayaan xubnaha aqalka sare, kuna xasiisayaan xildhibaannada aqalka hoose, iyada oo ay intooda badan u baratamayaan doorashada ama ay yihiin taageerayaan musharrax[8]. Sixidda arrimahan khaldan ee danta gaarka ah u adeegaya waa mid lagama maarmaan ah. Baarlamaanka waa in uu dib u eegaa, dibna u saxaa qorshaha doorasho, waana in uu si dhaqso ah u ansixiyaa hannaan dhameystiran kana habboon midka hadda qoran.

## Talooyin tixgelin mudan

- Aqalka Sare waa in aanu noqon mid laga buuxiyo saaxiibbada hogaamiyayaasha gobollada. Aqalkan cusub waa in uu metelaa dhammaan muwaadiniinta gobollada. Fikradda ah in madaxweynayaasha gobollada ay soo magacaabayaan laba musharrax islamarkaana baarlamaanka gobolka uu mid ka dooranayo waa mid aan dimoqraadi ahayn. Maadaama

[5] Waxaa 2016 loo mudaysnaa in ay dhacdo doorasho qof-iyo-cod ah, ma' aysanse suurto gelin, taas ayaana dani ku badday ka dhigtay in laqaato hannaankaan xulidda iyo doorashada isugu jitra. Hadda in doorasho xor ah la gaaro 2020 ayaa qorshe u ah Soomaalida iyo deeq-bixiyayaashaba http://www.un.org/press/en/2016/sc12333.doc.htm

[6] Eeg war-murtiyeedkii hiigsiga 2016, http://www.villasomalia.gov.so/wp-content/uploads/2014/11/VISION2016-_Final_COMMUNIQUE1.pdf

[7] Warmurtiyeedka ka aqriso halkan, http://www.wardheernews.com/wp-content/uploads/2016/04/NLF-Communique-Final-April-12-2016.pdf

[8] Madaxweyne Xasan Sheekh, Ra'iisul Wasaare Sharmarke iyo Madaxweynaha Koofur Galbeed intaba musharaxnimadoodu ma ahan mid qarsoon; Guuleedna in uu garab u yahay Madaxweyne Xasan waa mid aan sir ahayn;

aqalkan uu yahay mid cusub hal-ku-dhigga siyaasiyiintuna uu ahaa ‘waxaan hirgelinaynaa hannaan doorasho loo dhan yahay’ waa in xubnaha aqalka sare ay u codeeyaan codbixiyayaasha maamul-goboleedka oo idil, waana in aysan mudanayaashaasi noqon mid ay dhabarka ka soo taabtaan madaxda gobolada.

- Heshiiska hadda ay wada gaareen siyaasiyiinta federaalka iyo kuwa gobollada ma caddeynayo in soddon boqolkiiba metelaad ah ay haweenka ka helayaan baarlamaanka. Dukumintiga waxa uu tilmaamayaa in aqalka sare haweenku ay helayaan boqolkiiba soddon; dhanka aqalka hoose, waxa uu heshiisku tilmaamayaa in boqolkiiba soddon dadka u tartamaya xubinnimada baarlamaanka ay noqdaan haween. Arrinkan ma damaanad qaadayso in natiijada ay noqoto in soddon boqolkiiba haween xildhibaanno ah ay soo bixi doonaan; haweenka Soomaaliyeed waa
- in ay soddon boqolkiiba helaan kuraasta aqalka hoose ee baarlamaanka. Si loo xaqiijiyo in qabaa’ilka iyo siyaasiyiinta aanay boobitaan ku samayn haweenka, saamiga haweenka waa in meel loo dhigo, baarlamaankuna waa in uu ansixiyaa sharci degdeg ah ee waajib uga dhigaya guddiga doorashooyinka qaran in ay dhaqan geliyaan qoondada haweenka ee soddon boqolkiiba.

- Waa in uu jiraa hal guddi doorasho; guddiyada doorashooyinka gobollada waa in meesha laga saaraa maadaama doorashooyinka ay yihiin kuwo heer qaran ah. Weliba, gobollada iyagaa hadda ku badan xubnaha guddiga doorashooyinka heerka qaran ee lasoo jeediyay, fikradda ah in guddiyo kale oo ay gobollada sameysanayaan ay fuliyaan doorashooyinka qaranka, ma aha arrin maangal ah, haddii aanan loogu tala gelin in lagu afgambiyo hannaanka doorashada. Guddiga doorashooyinku waa in aanu noqon mid u adeega siddeed siyaasi. Waa in laga dhigaa xubnaha guddiga dad Soomaaliyeed oo la aamini karo, sumcadna leh, kana tirsan bulshada rayidka, ujeedadooduna tahay in ay dhaqan geliyaan doorasho xor ah oo xalaal ah.

- Guddiga doorashooyinka dalka waa in uu saxiixaa liiska xildhibaannada aqalka sare iyo kuwa aqalka hoose. Xubnaha Madasha Hoggaanka Qaran waa in aanay faragelin liiska xubnaha noqon kara ama aan noqon karin xildhibaanno. Hogaamiyayaasha xubnaha ka ah Madasha Qaran waa musharraxiin ama waxa ay taageersan yihiin musharraxiin kale haddii ay xuquuqdan la wareegaanna waxa ay afduuban doonaan hannaanka doorashada, waxa ayna dhaawici karaan rajada ah in doorasho xor ah oo xalaal ah ay dhacdo.

- Muqdisho waa in ay heshaa xubno u metela aqalka sare iyada oo ay ka muuuqato astaanta magaalo ah caasimadda dalka; in la duudsiiyo 1.7 malyan qof metelaadda ay heystaan muwaadiniinta kale waa mid aan cadaalad ahayn waana ku tagri fal awoodeed. Caasimadda waa in tusaale ahaan loo qoondeeyaa siddeed xubin, iyada oo afar loo qoondeyn karo dadka deggan magaalada iyada oo afarta kalana la siinayo Soomaaliweynta ay Muqdisho caasimadda u tahay. Arrinkan waxa uu noqon doonaa mid kumeel gaar ah ilaa laga gaarayo doorashooyinka sanadka 2020 oo ay xisbiyo siyaasadeed iyo codeyn guud xaqiijin doonaan culayska codadka muwaadiniinta.

- Waa in la abuuraa guddiyo kormeera doorashooyinka oo ay hormuud ka yihiin bulshada rayidka iyo beesha caalamka. Haddiiba beesha caalamku ay maalgelinayaan doorashadan kuna taageerayaan Soomaaliya dhanka diblomaasiyadda, waa in ay sidoo kale ku dadaalaan in ay xaqiijiyaan in hogaamiyayaal siyaasadeed aanay afduubanin hannaanka soo xulista baarlamaanka islamarkaana aysan ku shuban doorashada. Maahsanaan iyo garabsiin siyaasiyiin danley ah ma ahan waxa ay shacabka Soomaaliyeed ka filayaan beesha caalamka.

Akhristayaasha waxaa la ogeysiinayaa inay daabici karaan qoraalkan, haddii aaney ka ganacsaneyn. Maadaama uu Machadka Heritage leeyahay xuquuqda qoraalka, waxaa laga codsanayaa ciddii dibu u daabacda inay xusto Heritage, isla markaana Machadka lasoo socodsiiso.

**© Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda. Qoraalkan waxaa lagu daabacay hannaanka Creative Commons Attribution, qaybtiisa aan macaash-doonka aheyn (CC BY-NC 3.0).**